

NUXURKA KU JIRA INTERNETKA

Ka soo sheeg nuxurka sharci-darrada ah ama waxyeellada leh ee internetka, oo ay ku jiraan: Cunsuriyad, Nacaybka ajaanibta (Xenophobia), Agabka la xiriira xadgudubka galmada ee carruurta, Ku xadgudubka sawirrada gaarka ah Khayaanoooyinka maaliyadeed. Warbixinta u gudbi Irish Internet Hotline adigoo booqanaya www.hotline.ie.



Waxaad si ammaan ah, adoon magacaaga sheegin, isla markaana si qarsoodi ah u gudbin kartaa warbixin. Haddii la xaqiijiyo in nuxurku yahay sharci-darro, waxaa loo gudbin doonaa hay'adaha ku habboon, kuwaas oo la shaqeeya adeeg-bixiyayaasha si loo hubiyo in nuxurka sharci-darrada ah si habboon wax looga qabto loogana saaro internetka.

Coimisiún na Meán, oo ah hay'adda nidaamisa warbaahinta ee Ireland (www.cnam.ie), waxay ku talinaysaa in haddii aad la kulanto nuxur sharci-darro ah ama waxyeello leh oo internetka ku jira, marka hore aad uga warbixiso madasha (platform-ka) uu ku yaallo. Haddii aad dareento in xuquuqdaada internetka aysan madalku ixtiraamin, waxaad arrinta u gudbin kartaa **Coimisiún na Meán**, kuwaas oo wixii nuxur dembi ah u gudbin doona **An Garda Síochána**.



**SIDA LOO SOO SHEEGO
DEMBIGA NACAYBKA**

Xaalad degdeg ah, mar walba wac
999 ama 112.



Ku soo sheeg dembiga nacaybka
Xarunta Garda ee kuugu dhow.



Ka hel liiska dhammaan xarumaha
Garda bogga www.garda.ie.



La xiriir Khadka Qarsoodiga ah ee Garda
lambarka 1800 666111.




Isticmaal **Adeegga Internetka ee Garda**
ee Lagu Soo Sheego Dembiyada
Nacaybka adigoo booqanaya
www.garda.ie.



Ka hel **Sarkaalka Kala-duwanaanshaha**
(Diversity Officer) ee Garda ee
deegaankaaga bogga www.garda.ie.

**KU SOO SHEEG DEMBIGA
NACAYBKA INTERNETK**



An Garda Síochána

Ag Coinneáil Daoine Sábháilte - Keeping People Safe

.....

**DEMBIGA NACAYBKA KU
SALAYSAN WAA MID AAN
LA AQBALI KARIN**

**AAN SI WADAJIR
AH U JOOJINNO
NACAYBKA**

**KU SOO SHEEG
DEMBIGA NACAYBKA
HADDA**

WAA MAXAY DEMBI NACAYB KU SALAYSAN?

Dembi nacayb ku salaysan waa dembi kasta oo lagu geysto qof ama koox dad ah, iyadoo uu dembigaasi uga sii daray nacayb ku salaysan sifooyinkooda la ilaaliyo. Sifooyinka la ilaaliyo waa kuwan:

- Isirka
 - Abtirsiinta
 - Midabka
 - Jinsiga
 - Dhalashada
 - Astaamaha Jinsiga
 - Diinta
 - Jiheynta Galmada
 - Asalka Qaran
 - Naafonimada
- ama Qowmiyadeed

Noocyada dembiyada waxaa ka mid noqon kara weerar, burburin hanti ama dembiyo ka dhan ah kala dambeynta guud.

Ku soo sheeg dembiga nacaybka An Garda Síochána.

Dhacdooyinka aan gaarin heer dembi ciqaabeed, balse haddana sababa waxyeello iyo murugo, sidoo kale waxaa loo soo sheegi karaa An Garda Síochána.

MAXAA KA DHIGAYA DEMBIGA NACAYBKA MID KA DUWAN?

Dembiga nacaybku wuu ka duwan yahay noocyada kale ee dembiyada sababtoo ah waxaa lagu geystaa adiga cidda aad tahay awgeed. Waa weerar shakhsiyeed oo lagu bartilmaameedsanayo wax adiga kaa mid ah oo aanad beddeli karin ama aan lagaa rabin inaad beddesho, sida midabkaaga, isirkaaga, diintaada, jinsigaaga, jiheyntaada galmo, iyo waxyaabo kale oo la mid ah.



YAA NOQON KARA DHIBBANAHAN DEMB IGA NACAYBKA?

Qof, bulsho ama hay'ad ayaa noqon karta dhibbanaha dembi nacayb ku salaysan. Haddii lagu geystay fal rabshad, cabsi gelin ama cadaawad sababtoo ah cidda aad tahay, waxaa laga yaabaa inaad noqotay dhibbane dembi nacayb ku salaysan.



MA TANI WAA DEMBI NACAYB KU SALAYSAN?

Haddii aadan hubin in waxa kugu dhacay uu yahay dembi nacayb ku salaysan ama dhacdo nacayb la xiriirta, u soo sheeg An Garda Síochána. Waxay ku siin doonaan talo dheeraad ah waxayna qaadi doonaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah.



MAXAY SAMEYN DOONTAA AN GARDA SÍOCHÁNA?

An Garda Síochána waxay si dhab ah u qaadataa dembiyada nacaybka ku salaysan waxayna u baari doontaa dhammaan warbixinnada si xasaasi ah oo ixtiraam leh. Dhacdooyinka aan dembi ahayn waa la diiwaangelin doonaa waxaana loo tixgelin doonaa tallaabooyin dheeraad ah, haddii ay habboon tahay.

XEERKA CADDALAADDA DEMBIYADA (DEMBIYADA NACAYBKA KU SALAYSAN), 2024

Sharcigani wuxuu dhigaya ciqaabo ka culus dembiyada qaarkood marka la caddeeyo in ay ku salaysnaayeen nacayb ama in nacayb la muujiyey intii dembiga la geysanayey.

Tusaale ahaan, sharcigu wuxuu xaqiijinayaa in weerar lagu sii xumeeyey nacayb ama burburin hanti lagu sii xumeeyey nacayb ay mutaysan doonaan ciqaabo ka culus.